Policy Briefing

# Cawaaqibta Hardanka Siyaasadeed

**Loollanka ragaadiyey madaxda ugu sarreysa ee Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya ee horseeday in baarlamaanku kalsoonida kala laabto Ra'iisul Wasaare Cabdi Faarax Shirdoon 'Saacid' wuxuu dhaawac weyn u geystay sharciyadda dowladda, isla markaana wuxuu curyaamiyey awoodda ay dowladdu u leedahay bixinta adeegyada aasaasiga ah, sida amniga. Hardan kale oo dhaca wuxuu horseedi karaa burburka dowladda oo dhan.**

**Muddo sanad ka badan, Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud iyo R/Wasaare Saacid waxay muujiyeen midnimo iyo wadajir aan caadi aheyn. Waxay shacabka u ballan qaadeen dowlad bilaa khilaaf ah, maadaama ay asxaab hore ahaayeen.**

**Hadafkii ahaa in siyaasad loo dhan yahay laga shaqeeyo waxaa ragaadiyey hardan sokeeye, sida lagu yaqaannay dowladihii hore ee ku meel gaarka ahaa. Natiijada kama dambeysta ah waa hoggaan marin-habowsan iyo dowladda oo daciifta, isla markaana aanan laheyn isku xirnaansho gudaha iyo kalsoonida caalamka.**

**Xurguf sokeeye oo dhex marta madaxweyne iyo ra'iisul wasaare waa mid ay Soomaaliya ku caan baxday. Tan iyo sanadkii 2000, ugu yaraan 8 goor ayuu loollan noocan ah hakiyey geeddi-socodkii nabadda iyo soo kabsashada.**

**Madaxweynayaasha ayaa inta badan ku guuleysta hardanka, balse waxay ku waayi jireen sumcad iyo awoodda saameynta isbeddelka. Beesha caalamku waxay aalaaba ra'iisul wasaaraha cusub ka xigsan jirtay madaxweynaha. Ma muuqdaan wax caddeynaya in markan ay kuwii hore uga duwanaan doonto Madaxweyne Xasan Sheekh.**

## Asalka khilaafka

Waxaa si weyn loo rumeysnaa inuu madaxweynuhu cadaadis ku saaray R/wasaare Saacid inuu soo dhiso xukuumaddii ugu tirada yareyd taariikhda Soomaaliya. Markiiba waxaa soo ifbaxay warar sheegaya in la ballaarinayo xukuumadda 10-ka wasiir ka kooban, maadaama ay sidii laga rabay waajibaadkeedii u gudan weyday.

Isku shaandheyntii la filayey dhowr goor ayaa dib loo dhigay, taas oo dhalisay shaki ah inuu jiro khilaaf u dhaxeeya madaxda qaranka, isla markaana wasiirrada galiyey mugdi iyo isku kalsooni la'aan. Xukuumaddu ma noqon mid qabata dhammaan waajibaadkii horyaallay. Aragtida siyaasadeed ee Madaxweyne Xasan Sheekh, oo ku uruursaneyd Siyaasadda Lixda Tiir, ma noqon mid hirgashay.

Howlo badan oo muddeysan ayaa wakhtigii loogu tala galay lagu qaban waayey. Guulo kooban oo xagga amniga laga gaaray ayaa la lumiyey. Warar sheegaya in kooxo musuqmaasuq ku shaqaysta ay dib u qabsanayaan hey'adaha dowladda ayaa gaaray meeshii ugu sarreysay, kaddib markii ay is casishay guddoomiyihii hore ee Bangiga Dhexe, Yussur Abrar, 7 usbuuc kaddib markii shaqada loo dhiibay.

Markii ay billaabatay in laga aamin boxo dowladda ayay labada masuul ee ugu sarreysa billaabeen inay eedeymo isweydaarsadaan. Taageerayaasha madaxweynaha ayaa waxqabad xumada dowladda dhabarka u saaray R/Wasaare Saacid. Laakiin taageerayaasha R/Wasaaraha ayaa uga jawaabay eedeyn ay usoo jeedinayaan la taliayayaasha ku wareegsan madaxweynaha, oo ay sheegeen inay xagal-daaciyeen dhammaan wixii horumar la sameyn lahaa, iyagoo leh aragti kooban oo kooxeysi ku saleysan.

Isu-dheelli tirnaan la'aan u dhaxeysay hey'adaha fulinta ee dowladda ayaa sidoo kale qayb ka aheyd xurgufta labada masuul u dhaxeysay. Sidii aan ku qornay warbixinteennii bishii April, madaxtooyada ayaa loo arkay inay ruqsatay in ka badan awoodda uu dastuurku u cayimay.

Dastuuriyan, madaxweynaha ayaa oggolaada dhammaan magacaabista ugu muhiimsan iyo dhammaan sharciyada dalka, laakiin golaha wasiirrada ayaa leh awoodda fulinta ee ugu sarreysa dalka.

Eedeymaha loo soo jeediyo Madaxweyne

HIPS

Xasan Sheekh waxaa kamid ah inuu la wareegay qayb badan oo kamid ah awoodaha R/wasaaraha. Warbaahinta gudaha ayaa R/Wasaare Saacid ku sifeysa inuu yahay nin isku dhiibay madaxweynaha. Si kastaba ha ahaatee, taageerada uu R/Wasaare Saaciid siiyey madaxweynaha waxay aheyd mid aan la difiri karin, tan iyo intii aysan xiisaddani soo butaacin

## Halkay Sartu ka Quruntay

In kasta oo sanadkii la soo dhaafay ay Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud iyo Ra'iisul Wasaare Saacid Faarax Shirdoon muujiyeen isla-shaqayn iyo isku duubni aan horay loo arki jirin, haddana waa ay muuqatay in ay isku dhici doonaan. Hoggaanka hay'adda fulinta oo qaybsan ama awoodda fulinta ee ay shirkadda ku yihiin Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha, ayaa keenaysa in ay hardi madaxa is daraan madaxda qaranka.

Dastuurka qabyada ah waxa uu madaxweynaha awood u siinayaa in uu magacaabo Ra'iisul Wasaare, laakiin uma oggola in uu xilka ka qaado. Dasuurku waxaa kale oo uu awood badan siinayaa Golaha Wasiirrada, in kasta oo fulinta go'aammada siyaasadeed ay dhammaan u baahan yihiin oggolaanshaha Madaxweynaha.

Dastuurka qabyada ah waxaa loo sameeyey in uu isku dheelli tir u sameeyo qabaa'ilka Soomaaliyeed, si gole wasiirro oo awood leh, uuna hoggaaminayo Ra'iisul Wasaare ka soo jeeda beel, iyo madaxweyne ka soo jeeda beel kale, ay isugu dheelli tirnaadaan, mid kastaana uu xakameeyo awoodda midka kale.

Nasiib darro hannaankani waxa uu noqday mid sii baahiya isku dhaca madaxda sare ee dalka, taas oo si joogta ah u curyaamisay hore-usocdkii hawshii qaranka, siina hurisay kalsooni darraddii iyo iska hor-imaadkii beelaha. Markii la guda galo dib-u-eegista dastuurka, waa in si degdeg ah loogu noqdaa qaab-dhismeedka hey'adaha fulinta.

## Saamaynta hardanka siyaasadeed

Hardankan siyaasadeed  ee Soomaaliya, oo kusoo beegmay xilli uu aad u hoseeyo xawaaraha horumarka iyo waxqabadka, ayaa  wuxuu yeelan doonaa saameyn ballaaran.

Waa muuqataa in Al-Shabaab ay ka faa'iideysteen fursadaha ka dhashay madaxda iyagu isku-maqan. Muqdishana sidii ay sanad ka hor ahayd waa ay ka ammaan liidataa; weerarraduna waa soo bateen, waana kuwo beegsasho wata, kuwii horana ka dhibaato badan.

Xasaradda siyaasadeed waxay fursad siisaa kooxaha musuqmaasuqa ku nool, iyaga taageerada iyo codadka kala dallaalaya; haddii ay tusaale noqon karto qaabkii aan xishoodka laheyn ee codadka loo kala gadanayey doorashadii 2012-ka, waxay u badan tahay in hanti qaran ay gashay loollankan hadda socda.

Wakhti, awood iyo dhaqaale ayaa iyana geli doona in R/Wasaare cusub iyo xukuumadiisa la hawl geliyo, taas oo inta lagu jiraana - asbuucyada iyo bilaha soo socda - ay hakad geli doonaan dhammaan hawlaha qaranka.

Waxaa kor u kacaya tartanka beelaha iyadoo qabiil kastaa uu tiigsan doono inuu tolkiisa ku hubsado jagada wasiirka koobaad iyo wasiirrada kale. Tartanka noocaas ah ayaa sii badinaya colaadda iyo kala shakiga beelaha, siina kordhinaya jewi khilaaf iyo loollan.

## Kalsoonidii oo lumeysa

Taageerada dowladda ee shacabki meeshaan meel ka hoosaysa ma aysan gaarin illaa iyo intii dowladda la sameeyey sannadkii 2012-kii, dowladduna waxay u ekaatay mid aan waxba ka geddisneyn kuwii ka horreeyey ee musuqmaasuqa iyo tayo darrada ku caan baxay.

Xiriirka dowladda iyo gobollada ayaa sii xumaanaya.  Inkastoo dowladda iyo maamulka Jubbooyinka ay heshiisyo iyo wada-hadallo dhex mareen, haddana weli iskuma calool fayooba. Taageerada uu Guddoomiyaha Baarlamaanku u fidiyey dhismaha lix gobol oo ay ku jiraan saddexda gobol ee  ay sheeganayaan maamulka Jubbooyinka, iyana waxay ka mid ahayd culaysyada jira.

Puntland weli waxay ku adkaysanaysaa in aysan xiriir la lahaan doonin dowladda fedraalka ah. Wareeggii saddexaad ee wadahadallada dowladda iyo Somaliland oo ka dhici lahaa Turkey iyana waa la hakiyey. Duullimaadyadii diyaaradaha ee Muqdisho iyo Hargeysana waxaa loo joojiyey is-maandhaaf dhanka baasaboorrada ah.

Hardankan siyaasadeed waxa uu dowladda ugu kacayaa sumcad iyo ra'asumaal ballaaran oo ay ka kasbadeen bulshada caalamka ee Soomaaliya danaysa, kuwaas oo sanadkii lasoo dhaafay hiil iyo hooba siiyey dowladda Soomaaliya.

Deeq-bixiyayaashu waxay si weyn uga welwelsan yihiin towfiiq la'aanta madaxda qaranka. Marka taa lagu sii daro is-casilaaddii dhawaan ee

guddoomiyihii Bangiga Dhexe, oo eedaymo dusha uga tuurtay madaxtooyada, kalsoonidii caalamku ku qabay in dowladda ay ka go'an tahay hufnaan iyo isla-xisaabtan gabaabsi ayay soo noqoneysaa. Waxaa soo baxaya shaki laga qabo inay doorasho qaran dhici karto xilligii loo muddeysnaa ee 2016-ka. Dhanka kale dowladdu waxay ka gaabisay fulinta shaqooyin badan oo muddo cayiman laga sugayey. 11 guddi qaran oo dastuurku amrayey samayntooda, midna lama yagleelin. Hannaan cad oo dalka federaal looga hirgelinayo lama qaabeyn. Shuruuc badan oo lagama maarmaan u ahaa hawlaha qabyada ah lama diyaarin.

Golaha baarlamaankuna wuxuu qayb ka ahaa hardanka siyaasadeed. 250 mudane ayaa codkooda dhiibtay markii R/Wasaare Saacid kalsoonida lagala noqonayey, taas oo ah tiradii ugu sarreysay tan iyo xilligii doorashada 2012-ka. Sidaas oo ay tahay, mudanayaasha waxaa sanadkii lasoo dhaafay intiisa badan laga la'aa inay soo xaadiraan kalfadhiyada caadiga ah. Nasiib darro, soo xaadiritaanka ballaaran ee xildhibaannada waxaa loo fasiran karaa in daneysi gaar ah uu wado, ee aaney ka aheyn masuuliyad qaran.

Iyada oo sumcadda iyo taageerada dowladdu sii yaraanayso, waa adag tahay in la suuraysto in ay taabbo galayaan saddexda sanno oo soo socda hay'ado qaran oo Soomaaliya ka hirgeliya jewi cusub iyo siyaasad lagu midaysan yahay. Caqabadaha dowladda horyaallana waxay u soo ekaanayaan kuwa aanay ka gudbi karin.

## Gunaanad

Kalsoonida lagu qabo Dowladda Federaalka Soomaaliya, gudaha iyo dibaddaba, ayuu dhaawac weyn soo gaaray kaddib hardanka siyaasadeed ee horseeday in shaqada laga eryo R/Wasaare Saacid. Balse maadaama dad badani u arkeen inuu awooddiisa dastuuriga aheyd ku wareejiyey madaxweynaha, dad badani uma baroor-diiqi doonaan.

Madaxweynaha, oo imminka ku guuleystay loollankan, ayaa muddo dheer wuxuu ballaan qaadayey siyaasad aan loollan sokeeyey laheyn. Ha yeeshee, weerarka gaadmada ah ee uu ku qaaday R/Wasaare loo arkay mid aad u baritaaray, ayaa ka dhigeysa madaxweynaha in lagu eedeeyo inuu yahay siyaasi danaystay.

Iyadoo ay ciidanka nabad-ilaalinta AMISOM iyo taageerada caalamiga ah ay halbowle u tahay dowladda ayuu jawiga siyaasadeed ee dalku markale isku beddelay mid sumeysan. Wada shaqeyn iyo wadaninimo waxaa beddeshay bulaan iyo xafiiltan qabyaaladeed.

Sidaas oo ay tahay, xiisaddan waxay fursad labaad siin kartaa dowladda, haddii ay si wanaagsan u maamusho. Madaxweynuhu wuxuu helay fursad uu ku sixi karo khaladaadkii sanadkii hore. Si uu ugu guuleysto kalsoonida shacabka Soomaaliyeed iyo beesha caalamka, madaxweynaha waxaa la gudboon tallaabooyinka soo socda:

I. Magacaabista R/Wasaare leh tayo, sharciyad iyo madax-bannaani, hadafkiisuna yahay inuu majaraha dowladda kusoo celiyo waajibaadkii loo idmaday, isla markaana dib usoo celiya kalsoonida gudaha iyo midda dibedda.

II. In R/Wasaaraha cusub loo oggolaado inuu si madax bannaan usoo dhiso xukuumad iyana leh tayo iyo sharciyad

III. In loo oggolaado R/Wasaaraha cusub inuu waajibaadkiisa dastuuriga ah u guto si madax bannaan.

IV. In dibu heshiisiin dhab ah laga baadi goobo Soomaalida oo dhan, si loogu tallaabsado hannaanka axsaabta badan iyo doorashooyin xor ah.

Balse si looga waabto soo noqoshada xiisaddan oo kale, waxaa lama huraan ah in laga tashado, si lagu wada qanacsan yahayna loo soxo khaladaadka ku jira Dastuurka Qabyada ah. Isku dhafka hannaanka baarlamaaniga ah, iyo midka madaxweynanimada ah ma ahan mid ku habboon Soomaaliya.

Dalka waxaa u roon inuu qaato ama hannaan baarlamaani ah oo leh R/Wasaare si toos ah loo doortay, ama madaxweyne la doortay oo leh R/Wasaare awooddiisu kooban tahay, madaxweynuhuna uu shaqada ka fariisin karo.

Waajibaadka ugu horreeya ee horyaalla dowladda la dhisi doono, waa in arrintaas wada tashi ballaaran laga sameeyo, si loo qaabeeyo hey'adaha fulinta qaranka.